CUTUB 8: ARGAGGIXISANNIMADA IYO CERT

Cutubka dhexdiisa waxaad wax uga baran doontaa:

- **Waxa ay argaggixisannimadu tahay:** Qeexidda argaggixisannimada iyo yoolalka argaggixisada.
- **Hubka Argaggixisada:** Hubka argaggixisada lagu yaqaan ama looga shakiyo in ay haystaan iyo khatarta ay keeni karaan noocyada kala duwan ee hubka argaggixisada ah.
- **Muujiyeyaasha B-NICE:** Calaamaadka kugu caawiya in la ogaado marka uu dhaco fal argaggixiso ama uu ku dhaw yahay in uu dhaco.
- **CERTyada iyo Dhacdooyinka Argaggixisada:** Borotokoollada CERT ee dhacdooyinka argaggixiso iyo falalka is-dhawridda ah eek a dambeeya dhacdada.

CUTUB 8: ARGAGGIXISANNIMADA IYO CERT

SOO DHAWEYN IYO ARARTA CUTUBKA

Isagoo jeedinaya khudbadiisii Xaaladda Qaranka ee Jannaayo 29, 2002, ayaa wuxuu madaxweynuhu weydiistay dadka Maraykanka ah in ay ku deeqaan adeeggooda si loo hagaajiyo loona ilaaliyo dalkeenna, waxaanu abuuray barnaamijka *Citizen Corps* si loogu caawiyo in ay dadka Maraykanku uhu waajibaadkaa u gutaan.

Mid ka mid ah fursadaha mutaddawacnimada ee ay dalladda *Citizen Corps* ugu deeqday bulshada Maraykanka uhu waa barnaamijka CERT.

Iyadoo la eegayo khatarta kordhaysa ee weerar argaggixiso oo lagu soo qaado ciidda Maraykanka, xubnaha CERT waa in lagu tacliimiyo borotokoollada CERT iyo habraaca dhacdooyinka argaggixisannimo, iyo tallaabooyinka ay tahay CERT yadu qaadaan ka dib markii uu dhaco weerar argaggixiso oo iman kara.

Dhamaadka cutubkan, waxaad awoodi doontaa in aad:

- Qeexdo argaggixisannimada.
- Garato bartilmaameedyada la beegsan karo ee bulshada ku dhex yaal.
- Garato hannaanka ay CERT u hawlgasho haddii ay dhacdo argaggixisannimo.
- Qeexdo falalka aad ku kacaysid marka ay dhacdo fal loga shakisan yahay argaggixisannimo.

WAA MAXAY ARGAGGIXISANNIMO?

Wasaaradda Caddaaladda ee Maraykanka eray-bixinteeda argaggixisannimo waxa weeye:

> . . .isticmaal xoog oo sharci darro ah ama qalalaase ay koox ama shaqsi kula kacaan dad kale ama hanti si ay u cabsi geliyaan oo ay ugu sandulleeyaan dawlad, dad shacab ah, ama qayb iyagaa midkood ah, si loo gaaro higsi siyaasadeed ama mid bulsho.

Argaggixisannimada waxaa ku tallaabsan kara shakhsiyaad ama kooxo dalka gudihiisa ka jira ama kuwo qalaad. Iyadoo uusan Maraykanku u argaggixiso badnayn sida dalalka qaarkood, haddana waxaa nalala beegsaday weerarro dhawr ah oo halis ah, oo ay ku jiraan:

- Qarxintii World Trade Center (1993).
- Qarxintii Murrah Federal Building ee Oklahoma City (1995).
- Qarxintii lagu sameeyey Atlanta Olympic Games (1996).
- Qaraxyadii kiliinigyada qoysaska lagu qorsheeyo (carruurta lagu soo rido) iyo baararka khaniisiinta ee aagga Atlanta (1996 and 1997).
- Dumintii World Trade Center iyo qayb ka mid ah Pentagon-ka (2001).
- Diriddii waraaqaha ku sumaysan kudka (anthrax) ee la mriyey U.S. Mail (2001).

Mid kasta oo dhacdooyinkaa ka mid ahi wuxuu ina xusuusinayaa in aannu la noollahay suuraggalnimada weerarro kale oo argaggixiso oo ciiddeenna ka dhaca.

Weerarrada argaggixisada waxay dhici karaan digniin ama digniin la'aan. Sabatoo ah qaabka weerarrada argaggixiso waxay sababi karaan—ama inta badanba logu talaggalaa— in ay sababaan:

- Dhibaatooyin dad badan soo gaara.
- Khayraadka (sahayda) lagama-maarmaanka ah oo go'da.
- Adeegyada muhiimka ah oo khash-khashma.
- Dhaqaalaha oo khash-khashma.
- Argaggax shaqsi iyo dadweyne.

BARTILMAAMEEDYADA ARGAGGIXISADA

Argaggixisadu waxay bartilmaameedkeeda u xulataa in ay gaarto yoolkeeda. Tusaale ahaan, qarxintii Oklahoma City waxay ahayd nabar loola gol lahaa dawladda Federaalka ah oo argaggax dadweyne ka dhaliyey agaggaarka Oklahoma City oo dhan. Weerarkii 9/11 wuxuu nabarro u geystay saldhigyada dhaqaalaheenna iyo ciidankeennaba, iyagoo weliba dadka baabba'ay gaarsiiyey xad ay sarrayntiisu cusub tahay oo markaana bedelay sida uu Maraykanku uga fikiro nabdoonaantiisa.

Argaggixisadu waxay doortaan yoolalka "jilicsan" ama aan aad loo dhawrin ee badiyaa ma doortaan meelaha "adag" ama aad u amnigooda loo sugo..

Argaggixisada waxaa sidoo kale soo jiita munaasabadaha waaweyn sida socodka dadka badan ay wada maraan meel ama munaasabaadka ciyaartoyda. Sababtan awgeed, ayaad meelahaa ugu arki kartaa tallaabooyin lagu sugayo oo argaggixisada cabsiinayo oo looga hortegayo.

HUBKA ARGAGGIXISADA

Khubaradu waxay guud ahaan isku raaceen in ay jiraan shan cayn oo argaggixisadu ay hub ahaan u isticmaasho. Soo gaabinta B-NICE ayaa kugu cawinaysa in aad si fiican u xusuusato.

Hubabka loo malaynayo in ay ugu yaraan qaar kooxaha argaggixisada ka mid uhu heli karaan waxaa ka mid ah:

- Hub bayooloiji ah
- Hub nukliyeer iyo aaladda firdhiya reedhiyoolojiga
- Aaladda guban kara
- Hubka kiimikada ah
- Aaladda qarxa

1. **H**ub bayooloji ah. Sidayaasha bayoolojiga ah waxaa laga helaa dabiicadda. Si kasta ha ahaatee, waddamada qaar ayaa ikhtiraacay hannaan hub looga dhigo sidayaasha bayoolojigac ah si markaa loo baahin karo si ay u saameeyaan in badan oo ka mida dadka, xayawaanaadka, ama dalagyada beeraha.

   Qaar ka mid ah sidayaasha bayoolojiga ah ayaa fidi kara, laakiinta inta badan sidaa maaha. Noocyada ay kugu geli karaan hubka bayoolojiga ahu waa:
   - Neefsi (jiidid ah).
   - Cunid.
   - Jiqid (dhuuqid).

   In badan oo ka mid ah – kulligood maaha – oo sidayaasha bayoolojiga ah ayay maalmo ama toddobaadyo qaadataa in astaamahoodu ay soo shaac baxaan. Waxaa suuroggal ah in weerar bayooloji uu dhaco oo aan la ogaanin muddo xoogaa ah.

HUBKA ARGAGGIXISADA (WELI SOCOTA)

Waxaa iyana suuroggal ah in qaar ka mid ah sidayaasha bayoolojiga ay u faafaan meel kaba durugsan meeshii lagu sumeeyey oo dadka sumoobay dadka ay la dhaqmayaan ay sii faafiyaan meesha uu siduhu gaarey.

Nasiib wanaag, inta badan sumeeyeyaasha bayoolojiga waa kuwo aad u nugul oo ay si sahlan u burburin karaan kulka, iftiinka, iyo saameeyeyaal kale oo bay'adeedba. Intaa ka sakow, farsamada qallafsan ee adag ee loo baahan yahay in qurubyo yar yar oo hawada heehaaba loo kaydiyo ayaanay inta badan kooxaha argaggixisada ahu awood u lahayn.

2. **H**ubka nukliyeerka ah. Weerar argaggixiso oo nukliyeer ahi wuxuu aad uga duwan yahay mid caadi ah oo aaladda qaraxda ah. Waxaa laga yaabaa in ay dhaawac halis ah noqdaan ama ay geeriyoodaan dad aanu ku dul dhicin weerarkii billowga ahaa. Aagga ay saamayntu gaadhana wuu ka ballaarraan doonaa weerar caadi ah, qashinka burburka iyo waxyaabihii sidooda kale aan halista u ahaynina way sumoobayaan. Saamaynta caafimaad ee mustaqbalka dheerna waxay noqonaysaa mid ay adag tahay in la xaqiijiyo oo la maareeyo. Nasiib wanaag, khubarada ayaa saadaalinaysa in dhib badnaanta la xiriirto helidda iyo xannaannaynta nukliyeerka awgeed, ay in ay koox argaggixiso ahi inta ay nukliyeer hesho markaana xannaannayso oo isla markaana riddo ay tahay mid khatar yar.

   Aaladda Firdhinta Shucaaca (RDDs) ayaa loo aaminsan yahay in uu halis badan leeyahay, waayo maaddooyinka shucaaca ayay helidoodu ka sahlan tahay maaddooyinka nukliyeerka cokan, farsamada ay u baahan tahay qarxinta RDD ayaa la mid ah midda ay u baahan yihiin qaraxyada caadiga ah.

   Maaddooyinka shucaacu waxay yaalliin isbitaallada iyo meelaha kale ee caafimaad, shaybaarrada sayniska ee jaamacadaha, iyo waxyaabo kale oo ganacsi loo isticmaalaba. Aragaggixisada doonaysa in ku weerartanto RDD, waxay u baahanaysaa maaddooyin xoogaa iska yar ah oo raadiyoo aktifyo ah si ay u sameeyaan aalad waxgal ah.

3. **Aaladda** gubta. Aaladyada gubta waa kuwo makaanikaal ah, kuwo koranto, iyo kuwo kiimikaad oo si ulakac ah loogu isticmaalo in ay curiyaan qarxid oo ay dab billaabaan. Aaladda gubta waxaa uu ka kooban yahay saddex waaxood oo aasaasi ah:

   - Qaraxshe ama fiyuus
   - Weel ama dub sare
   - Maadadii gubanaysay, ama buuxshe

   Aaladda gubta waa ay sahlan tahay in la sameeyo. Aaladda uu ku jiro gubte kiimikaad wuxuu inta badan ka samaysan yahay bir ama aalad kale oo aan jabayn (balaastiikse ma noqon karo waayo kiimikooyin badan ayaa daxalle ah); aalad uu ku jiro maaddo gubata oo dareere ah sida caadiga ah waa mid la jebin karo sida dhalada.

4. **S**umeeyeyaasha kiimiko. La mid maaha sumeeyeyaasha bayooloji iyo maaddooyinka nukliyeerka oo ay adag tahay in la soo saaro, oo waxyaabaha loogu baahan yahay in hub kiimiko ah la sameeyo waxaa laga helaa alaabada caadiga ah iyo betrookiimikada. Argaggixisadu alaabtaa caadiga ahay u rogi karaysaa hub halis ah.

HUBKA ARGAGGIXISADA (WELI SOCOTA)

Waxaa jira saddex cayn oo hub kiimikaad ah:

- Sumeeyeyaasha nabarrada waxay sababaan boogo, dabab, iyo dhaawacyo kale oo tiftafyada soo gaara. U feydnaantu waxaa laga dhigi karaa hoor ama uumi gaara jir kasta oo qaawan, in la neefsado, ama la liqo. Sumeeyeyaasha nabarrada waxay ka kooban yihiin dhawr bahood oo kiimikaad, oo ay ku jiraan mustarka (mustard) iyo liwisaytka (lewisite.) Saamaynta sumeeyeyaasha nabarrada waxay la mid noqon kartaa kuwa la isticmaalo marka mudaaharaad rabsho wata la xakamaynayo (tus., gaaska CS) laakiin isagama tagaan markii hawo cusub la aado. Runtii, saamaynta inta ugu badan oo sumeeyeyaasha nabarradu way sii kordhaan mana gaaraan meesha ugu sarraysa 12 ilaa 18 ka saacadood ee ay qofka halelaan gudahooda.

- Sumeeyeyaasha dhiigga (saameeya) waxay dhex galaan wareegga dhiigga waxaanay unugyada dhiigga ka dhameeyaan oksijiinta. Sumoobiddu waxay ku iman kartaa hor ama uumi taabta jirka, neefsi, ama cunid. Sumeeyeyaasha dhiiggu waxay ka kooban yihiin laba bahood oo waaweyn kiimikaad, oo ay mid yihiin haydarojiin saayanaaydh (hydrogen cyanide) iyo sayaanajiin kolloraydh (cyanogen chloride.) Dadka ay saamayso sumeeyeyaasha dhiigga waxay u hareeraha dhabannada iyo sanka iyo afka geesahiisa uga muuqanayaan “buluuki.” Markii ay astaamaha sumeeyeyaasha dhiiggu sii kordhaan, dhibbanuhu inta soo kogo ayuu miyir beelayaa.

- Sumeeyayaasha mergashadu waxay weeraraan sambabbada. Marka ay dhacdo sunqaadis neefsi ku tumid, sambabbada hoor ayaa ka buuxsama oo ka ilaaliya in uu dhuuqo oksajiinta, iyo in ay kaarboon dhayoksaydhu ka baxdo dhiigga. Dhimashadu waxay ka timaaddaa oksajiin la’aan waxayna la mid tahay hafashada. Labo sumeeye oo mergashada ah oo caam ahi waxay yihiin fosjiin (phosgene) iyo koloriin (chlorine.)

- Sumeeyayaasha neerfayaasha waxay saameeyaan habka dhexe ee neerfayaasha. Sumeeyayaashani sida ugu degdeg badan ayay u hawlgalaan waana kuwa ugu dilaasan sumeeyayaasha kiimikaad, waxayna wax ku dishaa muddo ilbidhiqsiyo ah sumoobidda ka dib. Dhibbaneyaasha sumeeyayaasha neerfaha waxay la kulmaan bu’da isha oo kaduudata, duuf, neefsiga oo adkaada, soo kogid, iyo joojin neefta. Saarin (Sarin) ayaa ah tusaale ka mid ah sumeeyayaasha neerfaha.

- Sumeeyayaasha mudaaharaadka lagu xakameeyo waxay sababaan in neefsigu ciriiryoomo, ilmona ay yimaadaan waxaana loogu talaggalay in dadka la awood tiro meeshii laga dili lahaa. Sumeeyayaasha mudaaharaadka lagu xakameeyo waxay sababaan xanuun daran, khaas ahaan meelaha qoyan ee jirka. Sumeeyayaasha mudaaharaadka lagu xakameeyo oo caanka ah waxaa ka mid ah CS (oo loona yaqaan “suntan “ilmada”) iyo kaabsikam (oo besbaas buufin la yiraahdo).

5. Qarxayaasha caadiga ah ayaa “hubka ay doorbidaan” u ahaa argaggixisada inteeda badan oo waxayna u isticmaaleen in ka badan boqolkiiba 80 ka mid ah weerarradooda. Iyadoo ay argaggixisadu isticmaalaan hubka saanadda millitari sida garnaylo, hoobiyeyaal, iyo hubka garabka laga tuuro oo hawada lagu liishaamo, khubaradu waxay khatarta ugu weyn u haystaan aaladda qarxa ee la macmalo.

Aaladda qaraxda ee la macmalo (improvised explosive devices (IEDs) waxaa ka mid ah aalad kasta oo si macmalaad ah loo sameeyo, iyadoo laysku dardarayo qarxadeyaal iyo alaabo kale oo loola gol leeyahay in wax lagu dumiyo, weji-doorsho, lagu dareen-weecsho, ama lagu handado. Bambaanooyinka ugu badan oo ay argaggixisadu isticmaasho waa macmal. Alaabta ceeriin ee loogu baahan yahay in la sameeyo inta badan qarxayaasha caadi baa suuqa looga iibsan karaa (Tus., amooniyan nitreyt, oo bacrimiyennimana loo isticmaalo), waxaa laga iiban karaa shirkadaha ganacsiga ee sahayda qarxinaha, ama waxaaba laga samayn karaa ashyaa' iska diyaar ah o gurigaba laga helo.

HUBKA ARGAGGIXISADA (WELI SOCOTA)



Shaxankani wuxuu muujinayaa raadreebka iyo suuraggalnimada ay ku dhici karaan noocyada hubeed ee argaggixisada. Xusuusnow in:

- In kasta oo hubka nukliyeerka ahu uu dhaliyo raadreebka ugu sarreeya, haddana waxaa loo tixgeliyaa khatarta ugu yar maxaa wacay helid la'aantaa alaab heer hubeed gaarsiisan oo nukliyeer ah iyo adkaanta farsamada lagu samaynayo iyo dulqaadka lagu xannaanaynayo aalad nukliyeer ah oo laguna qarxin karo.

- Aaladda gubta, kan kiimikaad, iyo kan caadiga ah waxaa loo tixgeliyaa in ay leeyihiin khatar sare, laakiin raadreebkiisu uu hooseeyo.

- Hubka bayoolijiga ah ayaa loo tixgeliyaa in uu khatar sare iyo raadreeb sareba leeyahay—lakiin taa waa uun cudurrada aadka u faafa. Noocyada kale ee hubka bayoolojiga ah (sida kuwa u baahan aalad firdhisa) waxaa loo tixgeliyaa khatar hoose u nuglaanta sumeeyayaasha baayoloji ay u nugul yihiin kulka, iftiinka, iyo shoogga awgood.

MUUJIYEYAASHA B-NICE

Waa in aad ka digtoonaataa isbeddelka cimilada taas oo kuu noqon karta muujiye weerar argaggixisannimo oo dhici kara.

Muujiyayaasha cimilada ee weerar baayoloji iyo kiimikaad waxaa ka mid noqon kara:

- Tiro xoogaa ah oo xayawaan, kalluun ama shimbiro jirran ama dhintay ah. Duurjoogta ayaa inta badan weerarrada sumeeyayaasha kiimikaad iyo kuwa baayoloji uga nugul aadamiga. Xayawaanka, kalluunka, ama shimbiraha ay muuqanayso in ay jirran yihiin, dhimanayaan ama dhinteen waxay muujin kartaa weerar baayoloji ama kiimikaad oo meesha ku dhacay.

- Buufin aan jadwalaysnayn ama qalab buufineed oo la nacay. Argaggixisadii 11ka Sebteenbar waxaa la og yahay in ay sameeyeen doonis badan oo ku saaabsan gadashada ama barashada sida loo duuliyo diyaaradaha wax lagu buufsho. Noocyo kale oo badan oo buufiyeyaasha beeraha ah ayaa lagu firdhin karaa sumeeyayaasha baayoloji iyo (sida ay u badan tahay) kuwa kiimikaad.

- Daruuro uumi ah ama ceeryaan aan meeshaa caadi ka ahayn waqtiga maalintaa ah ee lagu jiro. In kasta oo aan in badan oo sumeeyayaasha kiimikaad iyo kuwa baayoolojiga isha oo qaawan lagu arki karin, ashyaa'da ay ka lushaan marka la buufiyo waqi xoogaa ah oo weerarka ka dambeeya ayaa ay muuqan karayaan.

- Maqnaanshaha dalag, ugaar, ama cayayaan caan ku ahaa meeshaa, waqtigaa maalinta ah, iyo sanadkaas. Ka war haynta waxaan joogin bay'adda oo ay ahayd in ay joogaan waxay la muhiimad tahay ogaanshada waxa dhex jooga bay'adda oo aan meesha looga baahnayn.

- Baabbuurro qalaad, sanaaddiiq iyo alaabo bakadaysan oo aan lala joogin. Argaggixisadu waxay leeyihiin taariikh dheer oo ah in ay ku qariyaan qalab qarxa baakadaha, sanaaddiiqda, ama baabbuurta. Alaabaha qalaad ama kuwa aan lala joogin waxay calaamad u noqon kartaa weerar argaggixiso oo suuroggal ah.

- Baakado ay wax ka tifqayaan waxay noqon karaan kuwo aan dhib lahayn—laakiin waxaa kale oo ay muujin karaan dhacdo argaggixisannimo. Argaggixisadii Saarinta ku sii deysey waddada hoose ee Tokyo (Aum Shinrikyo) waxaa uun ay daldalooliyeen baakado ay Saarin ku jirtey, meeshiina way ka tageen markii ay suntii soo tifiqday.

- Maaddooyinka ama qalabka aan meesha caadiyan u oolli karayn. Aaladda firdhinta, qalabta shaybaarka, ama in badan oo maaddooyinka halista leh ah oo aan caadiyan meeshaas u oolli karaynin waxay muujisaa in uu socdo weerar argaggixiso ama uu billaaban rabo.

- Qaraxyo yaryar oo hoor, ceeryaan, ama gaasas firdhiya waa calaamad la hubo oo muujinaysa in ay wax khaldan yihiin.

- Ur ama dhadhan aan caadi ahayn.

MUUJIYEYAASHA B-NICE

Waxaad ogaan kartaa muujiyeyaal duleed oo weerar argaggixiso ah. Muujiyeyaal duleed oo suuroggal ah waxaa ka mid ah:

- Geeri ama jirro badan oo aan calaamado dhaawac oo muuqda lahayn. Tani waxay muujin kartaa weerar baayoloji ama mid kiimikaad.

- Dhibbanayaal badan oo isku astaamo ah. Astaamuhu waxay isugu jiri karaan min neef xiranta ilaa iyo jir dildillaaca ilaa dhareer aan joogsanayn, ilaa muruq bood aan xakamaysnayn, ama kaduudasho. Dhamaan astaamahani waxay muujiyaan in weerar kiimikaad uu dhacay.

- Tiro badan oo dad ah oo raadsanaya daaweyn caafimaad oo iyagu muujinaya astaamo isku mid ah oo aanan caadiyan waqtigaa dhicin. Astaamaha in badan oo ka mid ah sumeeyayaasha baayoolojiga waxay u eg yihiin fuluu ama jirrooyinka kale ee caadiga ah. Dad aad u tira badan oo daweyn caafimaad u raba cudurka fuluu iyadoo lagu jiro bisha Luuliyo, waxay kuu muujin kartaa inuu dhacay weerar baayoloji.

DIYAARINTA GURIGA IYO SHAQADA

Mar haddii nabdoonaanta kooxdu ay tahay muhiimadda koowaad, xubnaha CERT waa in ay fal argaggixiso oo suuroggal ah ula macaamilaan sidii calaamad joogsi ah (stop sign.) CERTyada uma qalabaysna umana tababbarra in ay wax ka qabtaan dhacdooyinka argaggixiso.

Waxaa jira dariiqooyin loogu diyaar garoobo dhacdo argaggixisannimo. Qaar ka mid ah tallaabooyinka loogu diyaar-garoobo dhacdooyinka argaggixiso waxay la mid yihiin kuwa khataraha dabiiciga ah laakiin qaar baa u baahan qorshayn khaas ah.

Tallaabooyinka loo qaado in loo diyaar-garoobo weerar argaggixiso waxaa ka mid ah:

- Kaydsiga guntin sahay musiibo ah. Sahayda musiibo ee dhacdooyinka argaggixiso waxay la mid yihiin kuwa khataraha kale waana in ay runtii ku jiraan radiyo beteri ku shaqeeya oo leh beteri kayd ah ama telefoon aan xarig lahayn ama midka gacanta. Dadka ku nool aagagga khatarta sare leh (sida kuwa ku nool meel ka mid ah 10-ka mayl ee aagga qorshaynta gurmadka oo u dhaw warshad nukliyeer) waxaa la siin doonaa xog dheeraad ah oo ay siin doonaan hay'aadka maaraynta gurmadka.

- Isla garashada meel nabdoon oo guriga ama meesha shaqada ka mid ah iyo weliba meel kale oo lagu kulmo oo ka baxsan guriga iyo meesha shaqada. Mar haddii aanay bulshadu horay u sii ogaan doonin in la guuri doono ama meesha la joogo lagu gabban doono, waxaa lagama maarmaan ah in labadaba la sii qorsheeyo. Mar haddii ay kiimikooyin badan ka culus yihiin hawada, qol nabdoon oo guriga ka mid ah waa in uu ku yaallaa heerka dhexe ee guriga ama heerka labaad (taxtiga maya) waana in uu leeyahay albaabbada ama dariishooyinka ugu yar ee suuroggalka ah. Meel lagu kulmo oo hoyga bannaanka ka ah waa in ay ku taallo meel aagga ka baxsan oo meeshay wax ka dheceen ur-koraadka ka ah.

DIYAARINTA GURIGA IYO SHAQADA (WELI SOCDA)

- Diyaari qorshe xiriir oo qoysku yeesho. Iyadoo ku xiran meelaha ay xubnaha qoysku kala joogaan marka uu weerarku dhaco, mar baanay suuroggal ahayn in la wada yimaado meesha lagu kulmayo. Wada-ogaashada qof lala wada xiriiro oo gobolka bannaanka ka ah ama xiriir qorshaysan oo kale oo uu qoysku yeesho waxay sahlaysaa ogaashada in xubnaha qoysku ay nabdoon yihiin.
- Baro hannaanka hoy ku gabbashada sahay gabbashana diyaarso. Hannaanka hoy ku gabbashada ee weerar kiimiko ama baayoloji waxaa ka mid ah ayka muuqdaan muuqaalka.

Hannaanka hoy ku gabbashada ee weerar kiimiko ama baayoloji waxaa ka mid ah:

- Xiridda habka layrsiga iyo qataaridda albaabbada iyo daaqadaha oo dhan si loo yareeyo hawada ka imanaysa dibedda.

- Isticmaalidda balaastiig hore loo sii googgooyey so loogu awdo meelaha ay hawadu qolka ka soo geli karto, oo ay ka mid yihiin albaabbada, daaqadaha, layrsiyada, sokedyada korantada iyo kuwa telefoonka! Markii la googgooyo, daboolladu waa inay dhaafaan dhawr inji meelaha albaabbada ama daaqaduhu ay ku eg yihiin si markaa koollo xarigta loogula dhejin karo derbiyada iyo meelaha hawadu ay ka iman karto oo dhan.

- Ku dhejinta waaraadka balaastiigga ah dhamaan hareeraha albaabbada iyo daaqadaha adigoo koollo xarig (duct tape) isticmaalaya si loo xaqiijiyo sharitaan wanaagsan.

- Ku shar koollo xarigga meelaha kale ee ay hawadu ka imaan karto, sida albaabbada hoostooda iyo meelaha ay qasabaduhu ama tuubbooyinku guriga ka soo galaan. Hawada waxaa lagu celin karaa iyadoo shukumaanno iyo ashyaa kale oo jilicsan lagu sharayo meesha ay hawadu ka soo geli karto, dabadeedna lagula dhuujinayo koollo xarig.

- Dhegayso raadiyo beteri ku shaqaynaya si aad u ogaato markay halistu dhamaato. Kiimikooyinka loo isticmaalo weerar waxaa sida dabaylaha waanay kala firdhaysaa xoogaa ka dib. Dhegayso warbaahinta EAS si aad u ogaato marka ay nabdoon tahay in laga baxo qolka nabdoon.

CERTYADA IYO DHACDOOYINKA ARGAGGIXISO

Xusuusnow in:

- Nabdoonaanta kooxdu ay tahay muhiimadda koowaad. Dhamaan xubnaha CERT waxay naftooda iyo gacalkooduba xaq ugu leeyihiin in aanay iyagu dhibbanayaal noqonin tiiyoo ay isku deyayaan in ay dad kale caawiyaan.
- Mar kasta same qiimayn buuxda oo istaag, eeg, dhegayso, kana fikir inta aadan wax fal ah qaadin. Tixgeli:
  - Khataraha, kuwa taagan iyo kuwa dhici kara.
  - Awoodda kooxda, oo ay ku jirto inta xubnood oo CERT ah oo la heli karo, tababbarrada ay qabeen, iyo qalabka markaa yaalla goobta.
  - Meelaha ay kooxdu ka liidato.

CERT-YADA IYO DHACDOOYINKA ARGAGGIXISO (WELI SOCDA)

Borotokoolka CERT ee dhacdooyinka argaggixiso:

- Sida maaddooyinka halista ah oo kale, ayay dhacdooyinka argaggixisannimo u yihiin calaamad joogsi xubnaha CERT.

- Maskaxda ku qabo aagga oo idil inta lagu jiro qiimaynta. Haddii ay qaar ka mid ah muujiyeyaasha dhacdo argaggixisannimo muuqanayaan, ha sii wadin wax-qabashada.

Haddii argaggixiso isticmaalayso Hubka aadka wax u gumaada (WMD) laga shakiyo, waxa ay CERTyadu qaban karaan aad bay u kooban yihiin. Waxqabtayaasha xirfadleyda ah waxay u baahan doonaan alaab iyo shaqaale khaas ah oo wax ka qabta dhacdooyinka argaggixiso.

Haddii ay kuu muuqdaan qaar ka mid ah muujiyayaasha dhacdo argaggixiso, waa in:

- Aadan taaban!

- Ka fogow walaxda ama aagga.

- U sheeg madaxda meesha markiiba.

Telefoonnada gacanta iyo raadiyeyaasha labada-dhinac waxay abuuraan koranto ma guurto ah waxaanay qarxin karaan qalabka qarxa. Xubnaha CERT waa in ay mar kasta qalabyada ay uga shakiyaan in ay qarxaan ku soo tebiyaan telefoonka taarka leh.

IS-DARYEELIDDA WAQTIGA LAGU JIRO DHACDOOYINKA ARGAGGIXISO

Waa muhiim in aad taqaanno tallaabooyinka la qaado markii ay dhacdo argaggixiso dhacdo.

Waxaa jira saddex saameeye oo si weyn u saameeya nabdoonaanta markii ay dhacdo argaggixiso dhacdo:

- Waqti. Xadaynta xaddiga waqtiga la joogayo meesha ay wax ka dheceen waxay xaddiddaa u feydnaanta dhibtaas.

- Fogaan. Ka daldalo oo ka duruq aagga. Wax-ka qabtayaasha xirfadleyda ah waxay soo jeediyaan in meesha ay wax ka dheceen loo jirsado fogaan u dhexaysa 1,000 ilaa 1,500 oo feed. Meesha ay wax ka dheceen uga duruq ur-koraadka iyo dhinac-sare.

- Ka gaashaamashada. Gaashaanka dhisme kakan ama xitaa derbi wuxuu kordhin karaa ka xafidnaanta sumoobidda, shucaaca, iyo meelaha nabarrada ah.

Shuruudaha waqtiga, fogaanta, iyo gaashaamashada waxaa lagu saleeyaa qiimaynta billowga ah ee xaaladda. Haddiiaad ku jirto gudaha dhisme aan burburin oo aanad khatar dhaw ku jirin, waa in aad dhegaysataa warbaahinta EAS (Emergency Alert System) si aad u hesho xog ku saabsan in aad guuraysid ama aad hoygaaga ku gabbanaysid.

CERT-YADA IYO DHACDOOYINKA ARGAGGIXISO (WELI SOCDA)

Haddii ay jirto wax sabab ah oo aad u rumaysato in sumoobid kiimiko, ama shucaac uu aaggaaga ka dhacay, adiga iyo sumeeyaha fogaan u dhexaysii. Haddii aad u feydanto sumeeye kiimiko ama shucaac, isticmaal hannaanka sundaweynta ah ee asaasiga ah.

Hubi in aad samaysay dhibcaha hoos ku taxan:

- Ka tag aagga sumoobay markiiba (ugu yaraan 1,000 ilaa 1,500 oo feed ur-koraad iyo dhul sare) si aad u xaddido waqtiga aad u feydan tahay, loona yareeyo heerarka sumoobidda.

- Qaado tallaabo sun-daweyn ah. Ilbiriqsiyadu waa muhiim! Yoolku waa in la yareeyo waqtiga ay sumeeyayaashu iyo maqaarku istaabanayaan.

  - Wax kasta ka siib jirka, oo ay ka mid yihiin waxyaabaha laysku qurxiyo. Goo dharka si caadi ah madaxa uga siibmi kara si uusan qofku u neefsanin.
  - Dhag gacmaha inta aadan qubays u isticmaalin.
  - Jirka oo dhan oo ay indhaha, kilkilaha, iyo gumaarku ku jiraan ku biyo raaci, biyo badan oo gabow Biyaha kulul waxay furan daloollada dhogorta ee jirka waxayna sii badin karaan suuraggalnimada in ay suntu halkaa jirka ka gasho. Isticmaalka biyo badan waa muhiim sababtuna waa in ay kiimikooyinku ka falceliyaan biyaha yar.

    Haddii markaaba sun la heli karo, saabbuunta biyo ku qas si aad u sun-bixiso. Iska ilaali in aad ku rugto saabbuunta waayo rugiddu waxay jilcin kartaa lakabka jirka ilaaliya, taa oo markaa kordhisa gelitaanka ay suntu jirka gelayso.

    Haddii aad la shaqaynaysid saaxiib, wada shaqeeya si uu kiinba kan kale u sun-saaro. Haddii aad qof tuubbo ku furaysid, iska ilaali taabashada qofkaas iyo taabashada faniinkaba.

  - Taabasho ku qallaji adigoo isticmaalaya maro wax dhuuqda. Ha tirtirin maqaarka! Gasho dhar nadiif ah.

- U tag in lagu sun-saaro sida ugu dhaqsaha badan ee suuraggalka ah. Wax-ka-qabtayaasha xirfadleyda ah ayaa saldhigyo sun-saarideed meel ka mid ah goobta.

CERT-YADA IYO DHACDOOYINKA ARGAGGIXISO (WELI SOCDA)

DAWEYNTA DADKA KALE

Muhiimadda koowaad ee kooxaha CERT waa nabdoonaan shaqsiyeed. Xubnaha CERT waa in ay qadaan tallaabooyin ay isku-ilaalinayaan oo qura. Waa in aanad isku deyin in aad dhibbaneyaasha ku daweyso goobta sumaysan. Xubnaha CERT waxay dadka meesha ka tegaya u sheegi karaan in ay isticmaalaan sunbixinnada aasaasiga ah iyo in ay sugaan dadka gurmanaya.

WAXA AY SAMAYN DOONAAN WAXQABTAYAASHA XIRFADDA LEH

Waxaa jira dhawr tallaabo oo aad ka filan kartid in ay wax-qabtayaasha xirfadleyda uhu qaadi doonaan marka ay imaadaan meel ay ka dhacday dhacdo argaggixiso.

Tallaabada ugu horraysa oo uu xirfadle gumad ku yimid qaadi doono waa in marka ay goobta yimaadaan ay sameeyaan qiimayn dhamaystiran. Waxaad raacaysaa talaabooyin la mid ah kuwa ay CERTyadu u qaadaan in ay go'aan ka gaaraan:

- Waxa meesha ka soconaya.
- Xadkee buu xaalku xun yahay ilaa inteese uu sii xumaan karaa.
- Waa maxay tallaabooyinka la qaadi karo si xaaladda loogu xakameeyo si habboon.
- Khayraadyadee loo baahan doonaa.

CERTyadu waxay rajeyn karaan in ay gurmadyada xirfadda luhu dhacdooyinka argaggixiso ula tacaali doonaan sidii dhacdooyinka maaddooyinka halista ah. Sidaa darted, tallaabada xigta oo ay qaadi doonaan waxa weeye in ay aas'aasaan saddex aag oo dhacdada waafaqsan si loo yareeyo in sumowgu uu ka sii faafo meesha uu ka dhacay.

- Aagga kulul waxaa ka mid ah meesha ay wax ka dheceen iyo aagga sumaysan ee ku hareeraysan. Hadday wax ka dheceen banaanka, aagga kulul wuxuu u sii fidayaa dug-hoosaadka, iyadoo la tixgelinayo xawliga dabaysha.
- Aagga diirran waa ur-koraadka aagga kulul waxaana loo isticmaalaa in dhibbanayaasha lagu sun-saaro marka suntan laga saarayo dadka ay wax gaareen. Waxaa loogu baxshay aag diirran sababta ah in ay dhibbanayashu sun keeni karaan meesha. Xirfadleyda soo gurmatay waxay dadkaa u baahan sun-saaridda in loogu sameeyo aagga diirran meesha ku hayaan inta ay dhamaanayso sun-saariddu si aysan suntu u fidin.
- Aagga gabow wuxuu ku yaal ur-koraadka waana aag ka shisheeya aagga diirran. Dadka la sun-saaray ama aan sumoobin waxaa loo daabbulaa aagga qabow waxaana lagu hayaa halkaas inta ay xirfadleyda gurmadka ahi uga oggolaanayaan in ay baxaan.

Hawl: Ku Dabbakhidda Hannaanka CERT Meel Dhacdo Arghaggixiso Looga Shakiyey

Ujeeddo: Ujeeddada hawshani waa in laguu suurogeliyo in aad meel dhacdo argaggixiso looga shakiyey ku dabbakhdo borotokoollada CERT.

Tilmaamaha: Raac tallaabooyinka hoose si aad u dhamaysato hawsha:

1. U qaado in aad tahay CERT gaamuray oo kooxna laguu xilsaaray.

2. Adigoo kooxdaada miiska la shaqaynaya, aqri seenyada loo qoondeeyey kooxdaada, koox ahaanna u go'aansada tallaabooyinkii aad qaadi lahaydeen.

3. Waxaad haysan doontaa 10 daqiiqo oo aad ku aqrido ugana hadasho seenyooyinkaaga.

4. Dooro afhayeen jawaabta kooxda u soo gudbiya fasalka.

Seenyada 1:

Waa maalin iftiin badan oo qorrax leh oo gu' ah. Waxaad soo istaageysaa Xafiiska Boostada adigoo gurigaaga u socda shaqadana ka yimid. Markii aad soo gelaysid baarkinkaba waxaa ku gilgiley qarax waxaadna aragtay muraayad ka firdhanaysa daaqadaha Xafiiska Boostada oo ku wiiftamaysa baarkiinka. In kasta oo ay kugu qaadatay dhawr ilbiriqsi, waxaad ogaatay in uu qarax ka dhacay Xafiiska Boostada dhexdeeda.

Seenyada 2:

Waa maalin iftiin badan oo qorrax leh. Waxaad soo istaageysaa Xafiiska Boostada adigoo gurigaaga u socda shaqadana ka yimid. Markii aad soo gelaysid baarkinkaba, waxaad aragtay dhawr qof oo dhismaha ka soo baxaysa. Dhamaantood waxay u muuqdaan kuwo dawakhsan. Qaar baa laabta haysta indhahana marmaranaya. Mid ayaa dhulka ku dhacay oo u muuqdo in uu si u soo kogayo.

GEBAGGABADA CUTUBKA

Argaggixisannimada waxaa ku tallaabsan kara shakhsiyaad ama kooxo dalka gudihiisa ka jira ama kuwo qalaad.

Argaggixisadu waxay wax u weeraraan in:

- Ay cabsiiyaan dawladda ama dadka shacabka ah.
- Horumariyaan hadafyadooda.

Marka ay argaggixiso weerar qaaddo, yoolalkoodu waa in:

- Ay abuuraan dhibaato dad badan gaadha.
- Khashkhashaan khayraadka lagama maarmaanka ah, adeegyada muhiimka ah, iyo dhaqalaha.
- Sababaan argaggax shaqsi iyo mid guud.

Kooxaha argaggixisada ah waxaa lagu yaqaan in ay haystaan—ama looga shakisan yahay in ay haystaan—shan nooc oo hub ah.

Isticmaalidda soo-gaabinta B-NICE waxay kaa caawin doontaa in aad xusuusato noocyada hubka ee la rajeeyo in ay argaggixisadu isticmaali karto.

- Waxaa jira muujiyeyaal duleed iyo bay'adeed oo lagu garto weerarrada argaggixisada. Ka war haynta waxaan joogin bay'adda oo ay ahayd in ay joogaan waxay la muhiimad tahay ogaanshada waxa dhex jooga bay'adda oo aan meesha looga baahnayn.

Xubnaha CERT waa in ay dhacdooyinka suuroggalka ah argaggixiso ula tacaalaan sidii ay ula macaamili lahaayeen dhacdooyinka Maaddooyinka Halista ah (HazMat)—oo ah calaamad joogsi ah. Haddii ay u muuqdaan qaar ka mid ah muujiyayaasha dhacdo argaggixiso, waa in:

- Aysan taaban!
- Ka fogaadaan walaxda ama aagga.
- U sheegaan madaxda meesha markiiba.

.

CERTyadu waxay ku xadayn karaan u feydnaantooda waxyaabaha dhibta keena ee hubka argaggixisada ah iyadoo:

- Ay xadaynayaan waqtigooda feydnaanta.
- Ka daldashaan (guuraan) aagga ugu yaraan fogaan ah 1,000 ilaa 1,500 feed oo ur-koraad iyo tag sare ah.
- Isticmaalidda gabbaad iyadoo derbi adag ama gaashaan lagu gabbanayo.

GEBAGGABADA CUTUBKA (WELI SOCOTA)

Xubnaha CERT waa in ay tallaabo degdeg ah qaadaan si ay isu dhawraan, haddii ay wax gaaraanna, waa in ay degdeg u raacaan hannaanka sun-saaridda ee asaasiga ah. Mar haddii ay nabdoonaanta xubnaha CERT tahay muhiimadda Koowaad, xubnaha CERT waa in aanay isku deyin in ay daweeyaan qof sumoobay ama aysan sun-saarid dadkaa u samaynin.

Seenyooyinka dhacdooyinkaargaggixiso waa goobo dembi ka dhacay. Xubnaha CERT waa in ay iska ilaaliyaan in ay qaadaan wax tallaabo ah oo caddaymo la heli kari lahaa awdi karaya.